Washington State Department of Social & Health Services
Transforming lives

Macluumaada Caafimaadka Sirta ah Heshiishka Ogolaanshaha

Confidential Health Information Consent Agreement

Haddii laguugu wareejiyay barnaamijka Dhiiragelinta Fiicnaan-shaha (FWB) si ay qaybteena ugu caawiso dadka kale ee kulug leh daryeelkaaga in ay fahmaan baahooyinka caafimaadkaaga. Marka lagu jiro meelaynta guriga-dibadiisa-ah, muhiim ayay tahay in bixiyaasha daryeelka caafimaadkaaga iyo dadka kale ee kulug leh daryeelkaaga lagala hadlo dhexdooda waxa kusaabsan daryeelkaaga caafimaadka. Mararka qaar, diiwaanka caafimaadkaaga waxaa kujiri kara macluumaad kusaabsan:

- Adeego qorshaha qoyska ah sida xakamaynta dhallida iyo ilmo iska soo ridid;
- Cudurka Aydhiska HIV/AIDS; iyo/ama
- Cuduro galmada-la isuga gudbiyo (cuduro aad kaheli kartid marka aad galmo samaysid);
- Daawooyin Caafimaadka Maskaxda ah iyo adeego;
- Adeego Kutiirsanaan Kiimiko ah.

Maadaama macluumaada caafimaadka noocaan ah ay tahay mid sir ah, lammaanaha gacanta kuhaya macluumaada caafimaadgaaga masiin karaan macluumadaan caafimaadka dadkale illaa aad adigu ka ogolaatid middaas ama kayiraahdo qaanuunka Degmada Washington in ay siin karaan macluumaada dadkale. Middaan waa run haddii macluumaada caafimaadgaaga ay tahay mid kujirta nidaamka kombuyuutirka ama warqad kuqorantahay.

Sixiixida aan sixiixo ogolaanshahaan, waxaan ogolaanayaa in dadka aan kusheegay foomkaan ay ogolaansho u haystaan in ay arkaan macluumaadayda caafimaad ee sirta ah waxayna isula tashan karaan dhexdooda si ay iigu caawiyaan maamulida daryeelka caafimaadkayga. Macluumadaan caafimaadka waxay noqon kartaa mid timid kahor ama kadib taariikhda aad sixiixdid foomkaan. Diiwaanada caafimaadkaaga waxaa kujiri kara macluumaad kusaabsan jirrooyin ama dhaawacyo aad qabtid ama aad hore u qabtey; natiijooyin baaritaan, sida raajito,ama natiijooyin dhiig; iyo daawooyinka aad hadda qaadanaysid ama hore u qaadatay.

Haddii aadan sixiixin foomkaan, weli waxaad awood u leedahay in aad heshid adeegaha ka ahaada Dhiiragelinta Fiicnaan-shaha. **Dhammaan dhallinyarada da'adoodu tahay 13 ee loo soo wareejiyay barnaamijkeena waxaa laweydiin doonaa haddii ay rabbaan in ay sixiixaan foomkaan, haddii uu ku khuseeyo ama uusan ku khuseynba nooca macluumaada caafimaadka kujirta foomkaan.**

Sixiixa aan sixiixo oggolaanshahan, waxaan ku oggolaanayaa in dadka aan ku aqoonsaday foomkan ay u haystaan oggolaansho ay ku arkaan macluumaadkayga caafimaad ee sirta ah oona ayaga iskala tashan karaan dhexdooda si ay iigu caawiyaan in aan habbeeyo ama maamulo daryeelkayga caafimaadka. Macluumaadkan caafimaadka waxay noqon kartaa mid soo baxday kahor iyo/ama kadib taariikhda aan sixiixay foomkan. Diiwaankayga caafimaadka waxaa dhici karta in ay ku qoranyihiin macluumaad ku saabsan xanuunada iyo dhaawacyada aan hadda qabbo ama aan hore u qabbay sida; natiijooyin baaritaan (midkaas oo ay kamid noqon karto Raajooyin, iyo baaritaano dhiig), iyo daawooyinka aan hadda qaadanayo ama aan hore u qaatay.

ANIGU WAAN OGOLAHAY in aan u ogolaado Dhiiragelinta Fiicnaan-shaha in ay kahesho oona lawaddaagto macluumaada caafimaadkayga hoos lagu calaamadeeyay ee lammaanaha kuqoran foomkaan:

☐ Dhammaan diiwaanada macmiilkayga, ay kujirto Caafimaadka Taranka (tusaale ahaan xakamaynta dhallida, uurka, iyo ilmo iska soo ridid), Cudurka Aydhiska HIV/ AIDS iyo cuddurada galmada-la isugu gudbiyo/ caabuqa galmada la isugu-gubdiyo (STD/STI) natiijooyinka baaritaanka, diiwaanada ogaanshaha cudurka ama daaweynta (RCW 70. 02.220), diiwaanada Caafimaadka Maskaxda (RCW 70.02.230), iyo diiwaanada Kutiirsanaan Kiimiko (CD) (42 DFR Qaybta 2).

AMA keliya diiwaanada soo socda (Dooro dhamaan kuwa khuseeya):

☐ Cudurka Aydhiska HIV/AIDS iyo STD/STI natiijooyinka baaritaanka, ogaanshaha, ama daaweynta (RCW 70.02.220)
☐ Caafimaadka Taranka (Adeegaha qorshaha qoyska sida xakamayta dhallida iyo ilmo iska soo ridida)
☐ Diiwaadanada Caafimaadka Maskaxda (RCW 70.02.230)
☐ Diiwaanada Kutiirsanaanta Kiimikada (CD) (42 CFR Qaybta 2)
☐ Kuwo kale (qor): _____

ANIGU sidoo kale waan OGOLAHAY in lammaanaha lagu qorey foomkaan ay waddaagi karaan macluumaada caafimaadkayga ayaga dhexdooda, loolana waddaagi karin qof aan kuqornayn foomkaan. ANIGU waan bedeli karaa go'aankayga dibna waan ula laaban karaa ogolaanshahayga wakhti kasta aniga oo sixiixa foomka Kanoqoshada Ogolaanshaha kadibna siiya Shaqaalahayga Bulshada ama Dhiiragelinta Fiicnaan-shaha. Middaan ma ahaan doonto mid saameysa wax kasta oo macluumaad ah oo hore loo waddaagay. Xarfaha biloowga Magaca: _____

Aan ka ahayn haddii hore aan u buriyay aniga, macluumaada xaddidan oo kor kuqoran waa sax illaa ☐ Aniguba aanan kujirin daryeelka dhiirogelinta, ama illaa _____.

TAARIIKHDA DHICIDA

QOR MAGACA MACMIILKA	TAARIIKHDA DHALASHADA MACMIILKA
SIXIIXA MACMIILKA AMA WAKIILKA MACMIILKA SHARCIGA AH	TAARIIKHDA
QOR MAGACA WAKIILKA SHARCIGA AH	XIRIIRKA UU LA LEEYAHAY WAKIILKA SHARCIGA AH MACMIILKA

QOR MAGACA LAMMAANAYAASHA KAQAYB GALAYA	TAARIIKHDA	XARFAHA KOOWAAD EE MAGACA MACMIILKA
, Shaqaalaha Bulshada ee Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska		
, Waalidka Korinta		
, Bixiyaha Daryeelka Aasaasiga ah		
, Ururka Maamulka Daryeelka		
, Iskuduwaha Daryeelka Caafimaadka Guriga		
, Shaqaalaha Bulshada Qabiilka / Agaasimaha		

Oggaysiis loogu talogalay Qaatayaasha: Macluumaadkan adiga laguu sheegay waxay ka ahaadeen diiwaanada lagu ilaaliyay xeerarka sirta dowlada, 42 Qaanuunka Xeerarka Dowlada (CFR), Qaybta 2. Xeerarka dowlada waxay kaa mamnuucayaan in aad sii sheegtid macluumaadkan aan ka ahayn haddii sii deyn kale laguugu oggolaaday oggolaansho qoran oo ka ahaaday qofka ay arinta khuseyso ama si kale looga oggolaaday dhinaca Qaanuunka Xeerarka Dowlada 42, Qaybta 2. Oggolaansho guud ee loogu talogalay sii deynta caafimaadka ama macluumaad kale ma **AHAN** mid ku filan ujeedadaan darteeda.